1215 East Michigan Avenue
P.O. Box 30480
Lansing, Michigan 48909-7980

Ogeysiis ku Saabsan Sida Macluumaadkaaga loo Keydinayo

Wuxuu dhaqangalayaa:1da Nofeembar, 2008

OGEYSIISKAN WAXA UU FAAHFAAHIN KA BIXINAYAA SIDA XOGTA CAAFIMAADKA EE AAN KAA HEYNO LOO ADEEGSANAYO IYO CIDDA LOO GUDBINAYO IYO SIDII AAD FURSAD UGU HELI LAHAYD MARKII AAD DOONTO INAAD MACLUUMAADKAAS OGAATO

FADLAN SI TAXADAR LEH U AKHRI (UGU NOQO)

Haddii aad wax su'aal ah ka qabto ogeysiiskan, fadlan la soo xiriir Madaxa Qeybta Keydinta Macluumaadka Caafimaadka ee Sparrow Health System oo laga soo xiriiri karo P.O. Box 30480, 1215 E. Michigan Avenue, Lansing, MI, 48909-7980.

YAA DHAQANGELINAYA OGEYSIISKAN

Ogeysiiskan waxa uu faahfaahinayaa sida ay u keydiyaan macluumaadka Goobaha Caafimaadka ee Sparrow. Goobaha Caafimaadka ee Sparrow waxaa ka mid ah hay'adaha hoos ku xusan ee hoos yimaada:

- Goobaha Caafimaadka ee Sparrow ee ay ka mid yihiin qeybahan oo dhan iyo unugyada uu ka kooban yahay Goobaha Caafimaadka ee Sparrow sida:
  - Xarunta Daryeelka Caafimaadka Haweenka ee Sparrow (Women's Health Center of Sparrow)
  - Xarunta Maareynta Miisaanka ee Sparrow (Sparrow Weight Management Center)
  - Sheybaarada Sparrow (Sparrow Regional Laboratories)
  - Adeegyada dadka da'da ah ee Sparrow (Sparrow Hospice Services)
  - Xarunta daryeelka gargaarka degdegga ah ee Mason (Mason Ambulatory Care Center)
  - Xarunta Caafimaadka Qoyska ee Sparrow (Sparrow Family Health Center)
  - Xarunta Daaweynta Qoyska ee Sparrow (Sparrow Family Medical Services)
  - Hawl wadeenada Cudurada Haweenka ee Sparrow (Sparrow Lansing OB/GYN Associates)
  - Xarunta Cudurada haweenka ee Sparrow (Sparrow OB/GYN Women's Center)
  - Xarunta Cudurada Caruurta ee heer gobol ee Sparrow (Sparrow Regional Children's Center)
  - Xarunta Cudurka Sokoroowga (kaadi Macaanta) ee Sparrow (Sparrow Regional Diabetes Center)
  - Xarunta heer gobol ee Kansarka ee Sparrow (Sparrow Regional Cancer Center)
  - Gargaarka degdegga ah ee Sparrow (Sparrow Emergency Room)
  - Daryeelka Degdegga ah ee Sparrow (Sparrow Urgent Care – Michigan Avenue)
  - Daryeelka Degdegga ah ee Sparrow (Sparrow Urgent Care – Okemos)

- Shaqaalaha caafimaadka ee goobaha Caafimaadka ee Sparrow iyo ciddii kale ee ka tirsan shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee awoodda loo siiyey in ay macluumaadka geliyaan galka bukaanka Goobaha caafimaadka ee Sparrow.
- Isbitaalka Takhasuska gaarka ah leh ee Sparrow, Shaqaalaha Isbitaalka Takhasuska gaarka ah leh ee Sparrow iyo shaqaaalaha daryeelka caafimaadka ee awoodda loo siiyey in ay macluumaadka geliyaan galka bukaanka ee Isbitaalka Takhasuska gaarka ah leh ee Sparrow.
- Isbitaalka Clinton, shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee awoodda loo siiyey in ay macluumaadka geliyaan galka bukaanka ee Isbitaalka Clinton.
- Shirkadda daryeelka caafimaadka ee Adeegga Bukaanka loogu Fidiyo Guryahooda ee Sparrow (Home Health Care of Sparrow, Inc.)
- Daryeelka Caafimaadka ee Bukaanka loogu fidiyo guryahooda (Sparrow Home Care
- Pharmacy Plus, Inc.)
- Shirkadda Farmashiyaha iyo Qalabka Daawada ee Sparrow (Sparrow Regional Medical Supply & Pharmacy, L.L.C.)
- Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee awoodda loo siiyey in ay macluumaadka geliyaan galka bukaanka ee Isbitaalka Sparrow.
- Shaqaalaha iyo Qandaraaslayaasha ka shaqeeya hay'adaha adeegga caafimaadka ee Sparrow.

- Xubnaha ka tirsan dadka mutadawiciinta ah ee aan u ogolaano in ay ku caawiyaan oo ay kuu fidiyaan adeegyada aad u baahan tahay.

Dhamaan dadka, hay'adaha, xarumaha iyo goobaha caafimaadka ee kor ku xusan ee loogu yeero "anaga" "waxeena" ama "Adeegga caafimaadka ee Sparrow Health System facility)" waxa ay dhaqan gelinayaan waxyaabaha ku xusan ogeysiiskan. Waxaa intaa dheer in dadka, hay'adaha, xarumaha iyo goobahan ay wadaagi karaan macluumaadka la xiriira daaweynta, lacag bixinta, iyo daryeelka caafimaadka ee la xiriira fulinta hawlahooda sida ku xusan ogeysiiskan.

BALANQAADKEENA DHINACA MACLUUMAADKA CAAAFIMAADKA

Waynu garowsanahay in macluumaadka adiga iyo caafimaadkaaga la xiriiira ay yihiin waxyaabo kuu gaar ah. Waxaa naga go'an in aanu ilaalino macluumaadka adiga iyo caafimaadkaaga la xiriira. Waxaynu abuurnaa diiwaan lagu qoro daryeelka iyo adeegga aad ka hesho Goobaha Caafimaadka ee Sparrow. Waxaynu dooneynaa in aanu kuu fidino adeeg tayo leh oo ku saleysan macluumaadka aad na siisey isla markaana aanu dhaqangelino sharciyada u degsan. Ogeysiiskan waxa uu saameynayaa dhamaan diiwaanka caafimaadka ee Goobaha Caafimaadka ee Sparrow. Waxaa suurto gal ah in dhakhtarkaaga gaarka ah uu leeyahay nidaam ama ogeysiis kale oo la xiriira isticmaalka dhakhtarka iyo la wadaagista macluumaadka ee macluumaadka uu kaa hayo.

Ogeysiiskan waxa uu ka hadlayaa sida aanu u isticmaaleyno macluumaadka aanu kaa heyno iyo cidda aanu la wadaageyno macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan. Waxaanu kale oo ku faahfaahineynaa xuquuqda aad leedahay iyo waajibaadka naga saaran isticmaalka iyo la wadaagista macluumaadka caafimaadka.

Sharci ahaan waxaa waajib nagu ah:
- In aynu qaadno talaabo kasta oo suurto gal ka dhigeysa in macluumaadkaaga caafimaadku noqdo mid kuu gaar ah oo la ilaaliyey.;
- In aanu ku siino ogeysiiskan ku saabsan waxyaabaha sharcigu na farayo ee ilaalinta macluumaadkaaga isla markaana
- Aanu raacno waxyaabaha ku xusan ogeysiiskan ee dhaqangalka ah xilligan aynu joogo (bogga kore ka akhri taariikhda uu dhaqangalayo).

SIDEE AYEYNU U ADEEGSANEYNAA ISLA MARKAANA ULA WADAAGEYNAA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA EE AANU KAA HEYSO.

Waxaa halkan hoose ku xusan siyaabaha kala duwan ee aanu u adeegsnayo isla markaana ula wadaageyno macluumaadkaga caafimaadka. Mid kasta oo ka mid ah siyaabaha aanu adeegsanayno ama ula wadaageyno waxa aynu ka bixineynaa faahfaahin isla markaana isku dayeynaa in aanu kuu soo bandhigno tusaale la xiriira. Halkan laguma soo koobin siyaabaha aanu adeegsaneyno ama ula wadaageyno. Dhamaan inta la inoo ogol yahay in aanu u adeegsano ama u wadaagno macluumaadka, waxa ay noqoneysaa mid ka mid ah kuwo hoos ku xusan. Sharciyada u degsan Michigan ayaa laga yaabaa in ay na farayaan in aan u helno ogolaansho gaar ah loo helo adeegsiga iyo sii gudbinta macluumaadkaa caafimaadka ee soo socda; tusaale ahaan, adeegsiga iyo sii gudbinta macluumaadka la xiriira hab dhaqanka (dhimirka) iyo isticmaalka maandooriyayaasha.

- **Daaweynta** . Waxa aynu u adeegsaneynaa macluumaadka caafimaadka ee aad na siiso sidii aanu kuugu fidin lahayn adeeg caafimaad, waxyaabaha aad u baahan tahay iyo adeegyada la xiriira. Xogtaas caafimaadka waxaanu la wadaageynaa dhakhaatiirta, kalkaaliyayaasha caafimaadka, farsamo yaqaanada, ardeyda baraneysa caafimaadka iyo dadka kale ee ka qeyb qaadanaya adeegga daryeelkaaga caafimaadka. Tusaale ahaan, Waxaa laga yabaa dhakhtar kaa daweynaya lug aad ka jabtay inuu u baahdo in uu ogaado in aad qabto cudurka sokorwga (kaadi macaanta) iyo in kale waayo waxa lagaa yaabaa in sokoroowgu dib u dhigo (daahiyo) mudada aad ku bogsan lahayd. Waxaa kale oo aanu xogtaada caafimaadka ula wadaageynaa dadka shaqada ku leh si aanu u dadajino adeegga laguu qabanayo sida qoritaanka daawada, sheybaarka, iyo raajada. Waxaa kale oo aanu la wadaageynaa macluumaadkaaga caafimaadka dad ka baxsan Goobaha Caafimaadka ee Sparrow ee laga yaabo in ay ka qeyb qaataan daryeelka caafimaad ee laguu fidiyo.

- **Lacag Bixinta**. Waxaynu u adeegsanaynaa macluumaadka caafimaadka ee ku saabsan daaweynta, qalabka iyo adeega laguu fidiyey si aanu u weydiisano bixinta kharashka daaweyntaada adiga, ceymiskaaga ama qole kale oo sadexaad oo u xilsaaran bixinta kharashkaas. Tusaale ahaan, waxaa suurto gal ah in loo baahdo inaanu ceymiskaaga la socodsiino qaliin lagugu sameeyey si uu ceymiskaagu noo siiyo kharashka qaliinka ama adiga laf ahaantaada laguugu celiyo kharashka aad ku bixisey qaliinkaas. Waxaa kale oo suurto gal ah in aanu wargelino ceymiskaaga adeegga daawada ee laguu fidin doono taasoo loo baahan yahay in ceymisku ogolaado ka hor inta aan adeegga laguu qaban si loo xaqiijiyo in ceymiskaagu bixinayo kharashka daaweynta.
- **Hawlgalka Daryeelka Caafimaadka**. Waxaanu u adeegsaneynaa isla markaana u wadaageynaa macluumaadka caafimaadka daryeelka caafimaadka dartiis. Adeegsigaas iyo isu gudbintaas macluumaadka waxa ay lama huraan u yihiin habsami u socodka hawlaha Goobaha Caafimaadka ee Sparrow iyo sidii loo hubin lahaa in dhamaan bukaanka iyo dadka jiifa Goobaha Caafimaadka ee ay helaan adeeg tayo wanaagsan leh. Tusaale ahaan, waaxaa suurto gal ah inaanu u adeegsano xogta aan kaa helno in aanu qiimeyn ku sameyno isla markaana ku qiimeyno waxqabadka shaqaalaha iyo adeegga ay fidiyaan. Waxaa kale oo suurto gal ah in aanu isugeyno macluumaadka bukaano kala duwan si aanu u qiimeyno hadii ay jiraan adeegyo dheeraad ah oo ay u baahan yihiin, adeegyada aaney u baahneyn ee ay tahay in la joojiyo iyo sida daaweynta qaarkood ay wax ugu tareyso. Waxaa kale oo suurto gal ah inaanu macluumaadka la wadaagno dhakhaatiirta, kalkaaliyayaasha caafimaadka, farsamo yaqaanada, ardeyda caafimaadka, iyo shaqaalaha kale ee daryeelka caafimaadka si ay dib ugu noqdaan ama aqoon uga kororsadaan. Waxaa kale oo suurto gal ah in macluumaadkaaga caafimaadka aanu u adeegsano isbarbardhigga macluumaadka caafimaadka ee goobaha kale si aanu u qiimeyno adeegga aanu u fidino bukaanka iyo sidii loo horumarin lahaa daryeelka caafimaadka iyo adeegga aanu qabano.
- **Xasuusinta Balanta Dhakhtartka**. Waxaa suurto gal ah in macluumaadka caafimaadka aanu kaa heyno u adeegsano in aanu kula soo xiriirno si aan kuu xasuusino balanta aad la leedahay dhakhtartka.
- **Doorashooyinka habka daaweynta**. Waxaa suurto gal ah inaanu u adeegsano macluumaadka caafimaadka ee aanu kaa hayno si aanu kuu wargelino ama talo kaaga soo jeedino hababka daaweynta ee suurto galka ah ee laga yaabo in aad daneyneyso.
- **Adeegyada la xiriira faa'iidooyinka aad ka heleyso daaweynta**. Waxaa suurto gal ah inaanu u adeegsano macluumaadka caafimaadka ee aan kaa hayno inaanu ku wargelino faa'iidooyinka caafimaad ama adeegyada kale ee laga yaabo inaad daneyneyso..
- **Hawlaha Ururinta Gargaarka Dhaqaalaha**. Waxaa suurto gal ah in macluumaadka caafimaadka qaarkiis u adeegsano in aanu kugula soo xiriirno si aanu kuu weydiisano in aad ka qeyb qaadato lacag loo ururinayo Goobaha Caafimaadka ee Sparrow. Waxaa laga yaabaa in macluumaadka qaarkood aanu u gudbino hay'adaha samafalka ee Sparrow ka dibna laga yaabo in hay'adahaas samafalku ay kula soo xiriiraan marka ay lacag u ururinayaan Goobaha Caafimaadka ee Sparrow. Waxa kaliya ee aanu u gudbineyno waa macluumaadka muujinaya halka lagaala soo xiriirayo sida magacaaga, cinwaankaaga, lambarada talifoonkaaga iyo taariikhaha lagaa daweeyey Isbitaalka ama laguu fidiyey adeeg.
- **Diiwaanka Dhismaha (Goobaha Caafimaadka ee)**. Waxaa suurto gal ah in aanu gelino qeyb ka mid ah macluumaadkaaga marka lagu seexiyo isbitaalka diiwaanka isbitaalka. Macluumaadkaas waxaa ka mid noqon kara magacaaga, goobta aad ku sugan tahay, xaaladadaada guud ee caafimaadka (sida qof ladan, ka soo reynaya, iwm) iyo diint aad aaminsan tahay. Macluumaadka ku qoran diiwaanka marka laga reebo diinta aad aaminsan tahay waa loo sheegayaa dadka magacaaga yaqaana oo na soo weydiiya. Macluumaadka ku qoran diiwaanka waxaa laga yaabaa in la siiyo shiikha diinta ee ka socda goobta aad ku cibaadeysato, xitaa haddii aaney magacaaga kugu weydiin. Haddii aad aaminsan tahay diinta masiixiga, waxaa laga yaabaa diinta aad aaminsan tahay in loo sheego sheekhyada isbitaalka soo booqanaya. Sidoo kale qoyskaaga, saaxiibadaa, iyo shiikha goobta aad ku cibaadeysato ee aad ka tirsan tahay way kugu soo booqan karaan isbitaalka isla markaana la socon karaan xaaladdaada caafimaadka si guud.
- **Dadka ka qeyb qaadanaya daryeelkaaga caafimaadka ama bixinaya kharashka daaweyntaada**
  Waxaa suurto gal ah in uu ogaado macluumaadkaaga caafimaadka qof ka tirsan qoyskaaga ama saaxiib kula ah oo ka qeyb qaadanaya daryeelkaaga caafimaadka. Waxaanu sidoo kale maclumaadkaaga u

gudbineynaa qofkii wax ka bixinaya kharashka daryeelka caafimaadka. Waxaa intaa dheer, in ay suurto gal tahay inaanu u gudbino macluumaadkaaga hay'adaha samofalka ah ee gargaar u fidineysa dadka dhibaatadu ka soo gaartey fatahaadda/dhibatooyinka dabiiciga ah si ay qoyskaaga u wargeliyaan xaaladaada caafimaad iyo goobta aad ku sugan tahay. Sida uu qabo sharciga gobolka Michigan waxaanu u gudbineynaa oo kaliya caruurta laga daweeyo cudurka waraaboowga, isticmaalka maandooriyayaasha, cudurada dhimirka, iyo uurka/daaaweynta uureyda sababo caafimaad dartood.

- **Cilmi baarista** Ka dib marka aad na siiso ogolaansho gaar ah isla markaana laga reebo qaar ka mid ah macluumaadkaaga caafimaadka, waxaa suurto gal ah in aanu u adeegsanu isla markaana la wadaagno hay'ado kale sababo cilmi barista ah la xiriirta. Tusaale ahaan, mashruuc cilmi baaris ah ayaa laga yaabaa in lagu ogaanayo isbarbardhigga caafimaadka iyo sida ay ugu bogsadaan bukaanka oo dhan mid ka mid ah daawooyinka ay horey u qaadan jireen daawo kale isla cudurka laf ahaantiisa. Ka dib marka aad ogolaato, waxaa suurto gal ah inaanu u gudbino macluumaadkaaga dadka diyaarinaya oo ka qeyb qaadanaya cilmi barista inaga oo shuruud uga dhigeyna in aan macluumaadka laga saarin dhismayaasha Goobaha Caafimaadka ee Sparrow. Cilmi baarista oo dhan waxa ay marayaan hab gaar ah oo lagu ogolaanayo. Habkaasi waxa uu qiimeyn ku sameynayaa cilmi barista la soo bandhigey iyo adeegsiga macluumaadka caafimaadka, iyada oo la is barbardhigayo baahida cilmi baarista iyo xuquuqda bukaanka ee ilaalinta macluumaadka u gaarka ah iyada oo la dhaqangelinayo sharciyada dawladda dhexe iyo kuwo heer gobol. Inta aynaan adeegsan ama aynaan u gudbin macluumaadka si loogu adeegsado cilmi baarista, waa in mashrucaas lagu ogolaadaa habka lagu qiimeynayo. Cilmi baarayaasha ka qeyb qaadanaya mashruuca cilmi baarista waxa ay ogaan karaan magacaaga, cinwaankaaga iyo macluumaadka kale ee muujinaya qofka aad tahay iyo dadka ka qeyb qaadanaya daaweyntaada.

XAALADO GAAR AH

Waxaanu macluumaadka caafimaadkaaga u gudbineynaa oo ula wadaageynaa hay'adaha kale sida uu qabo sharciga dawladda dhexe iyo kan heer gobol iyo sharciyada la xiriira ee hoos ku xusan sida ay hadba adiga kuu khuseeyaan.

- Dhaqdhaqaaq la xiriira Caafimaadka bulshada/dadweynaha ama warbixino la xiriirta xakameynta cudurada, xadgudub ama gabood fal isla markaana lama huraan u ah tirakoobka caafimaadka.
- In la baajiyo waxyaabo khatar ku ah caafimaadkaaga ama nabadgelyadaada ama laga hortago nabadgelyada iyo caafimaadka dadweynaha. Macluumaadkaas waxaanu u gudbineynaa dadka u xilsaaran in ay ka hortagaan cudurada.
- Dhageysi dacwadeed lagu ogaanayo sida dabagalka, baarista, ogolaanshaha ama sababta keentay dhimasho dhacday.
- Amar maxkamadeed ama arrin kale oo la xiriira fulinta sharciga oo ay ka mid noqon karaan qof xiran, talaabo xagga sharciga ah iyo waxyaabo la xiriia amniga qaranka.
- Ciidamada ama dadka horey uga tirsanaa ciidamada oo waajibka ay ku tahay in ay wargeliyaan ciidamada dawladda Mareykanka iyo ciidamada ajnabiga ah ee la faray in ay warbixinta u gudbiyaan goobahooda.
- Bixinta xubnaha jirka ee bini'aadamka iyo ku beeritaankooda jirka sida uu qabo sharciga hay'adaha maamula taas oo muhiim u ah habsami u maamulka iyo qeybinta xubnaha jirka bini'aadanka iyo ku beeritaankooda.
- Warbixinada la xiriira caymiska shaqaalaha iyo hawlaha la xiriira dhaqan celinta sida uu qabo sharciga ama sida aad u heli lahayd faa'iidada aad xaqa u leedahay ee la siiyo qofka ku jira ceymiska shaqaalaha ama dhibanaha dhibaatadu soo gaartey ama ku xanuunsadeyba.
- Dadka takhasuska ku leh baaritaanka meydka, maamulayaasha meelaha dadka lagu aaso si ay u xaqiijiyaan qofka dhintay, sababta keentay geerida iyo fulinta hawlaha laga doonayo in ay fuliyaan sharci ahaan.

XUQUUQDA AAD LEEDAHAY EE LA XIRIIRTA MACLUUMAADKAAGA CAAFIMAADKA

Waxa aad leedahay xuquuqda soo socota ee la xiriirta macluumaadka caafimaadka ee aan kaa heyno. Si aad u dhaqangeliso xuquuqdaas waa inaad u soo gudbisaa codsi qoraal ah Qeybta Maamulka Macluumaadka oo loogu soo hagaajin karo Sparrow Health Information Management Department, P.O. Box 30480, 1215 E.

Michigan Avenue, Lansing, MI 48909-7980. Waxaa laguu soo dirayaa foomamka la buuxinayo ee aad ku muujineyso nooca macluumaadka aad dooneyso ka dib marka aad codsato in laguu soo diro.

Xaqa aad u leedahay inaad baarto ama aad sawir ka sameysato. Xaq waxa aad u leedahay in lagu siiyo nuqul ka mid ah macluumaadkaaga caafimaadka ee lagu saleeyey daryeelka caafimaadka laguu fidiyey. Haddii aad codsato nuqul ka mid ah, waxaanu kaa qaadeynaa kharash suurto gal ah taasoo ah lacagta sawirka, boostada laguugu soo dirayo iyo waxyaabaha kale ee wehliya codsigaaga.

Waxaa suurto gal ah in aan diidno codsiga aad ku baareyso ama ku sawiraneyso xaalado kooban qaarkood. Haddii laguu diido macluumaadka caafimaadka ee aad codsatay, waxa aad codsan kartaa in diidmadaas dib loogu noqdo. Qof takhasus ku leh isla markaana ogolaansho u haysta ayaa Goobaha Caafimaadka ee Sparrow u xil saarayaan inuu diidmada dib ugu noqdo. Qofka sameynaya dib ugu noqoshada ma aha qofkii diidey codsigaaga. Waxaanu u hogaansameynaa wixii uu go'aan ku gaaro qofka sameeyey dib ugu noqoshada.

- **Xaqa aad u leedahay in wax laga bedelo**. Haddii aa aaminsan tahay in xogta caafimaadka ee aan kaa heyno aaney sax aheyn ama dhameystirneyn, waxa aad weydiisan kartaa in wax laga bedelo. Waxa aad xaq u leedahay in aad codsato in wax laga bedelo macluumaadkaas mar haddii aan macluumaadkaas laga saareyn laguna keydinayo Goobaha Caafimaadka ee Sparrow.

  Waanu diidi karnaa codsigaaga haddii aadan qoraal ahaan ku soo gudbin ama aysan jirin waxyaabo taageeraya codsigaaga. Waxaa intaa dheer, waxaanu kale oo diidi karnaa codsigaaga haddii aad naga codsato in aan wax ka bedelno macluumaad:

  - Inaga aynaan abuurin, sida kaliya oo aan ku bedeli karno waa haddii hay'addii abuurtey aan la heli karin si ay wax uga bedesho macluumaadkaas;
  - Aanu ka mid ahayn macluumaadka lagu hayo keydka macluumaadka ee Goobaha Caafimaadka ee Sparrow;
  - Aanu qeyb ka aheyn macluumaadka laguu ogol yahay in aad baaritaan ku sameyso ama aad sawir ka qaadato; ama
  - Macluumaadku sax yahay oo dhameystiran yahay.

- **Xaqa aad u leedahay in aad ogaato cidda aan u gudbino macluumaadkaaga**.
  Xaq waxa aad u leedahay in aad codsato "tirakoob cidda loo gudbiyey macluumaadka". Taasi waa shax ay ku dhan yihiin hay'adaha aanu u gudbiney macluumaadkaaga sababo ka baxsan daryeelkaaga caafimaadka, bixinta kharashka daaweynta ama aadan siin ogolaansho qoraal ah ama waxyaabaha aanu ku siiney fursad aad ku diidi karto (sida balan xusuusiyayaasha, diiwaanka Goobaha Caafimaadka ee , iyo u gudbinta macluumaadka ee qoyskaaga, saxiibadaa inta uu socdo daryeelkaaga).

  Codsigaaga waa inuu ku cad yahay mudada aad codsaneyso oo aan ka badneyn lix (6) sano isla markaana aaney ku jirin wixii ka horeeyay 14kii Abriil 2003. Waa in aad codsigaaga ku caddeysaa sida aad u dooneyso in aad ku hesho macluumaadkaas (warqado ama hab kombiyuutarka laguugu soo diro) Codsiga ugu horeeya ee aad sameyso laba iyo tobanka (12) bilood gudahood waa lacag la'aan. Shaxda dheeraadka ah ee aad codsato wixii ka dambeeya mudadaas waxa aad bixineysaa kharashka ku baxa inta laguu diyaarinayo shaxdaas sidoo kale waxa aad codsan kartaa in aad ka noqoto codsigaas ama aad wax ka bedesho inta aynaan gelin kharash dheeraad ah.

- **Xaqa aad u leedahay in aad codsato in la xakameeyo macluumaadka.** Waxa aad xaq u leedahay in aad xakameyso ama xaddido dadka aanu u gudbin karno maclumaadkaaga caafimaadka dhinaca daaweynta, bixinta kharashka iyo hawlgalka caafimaadka. Waxaa kale oo aad xadidi kartaa macluumaadka caafimaadka ee uu ogaanayo qof ka mid ah dadka u xilsaaran daryeelkaaga caafimaadka ama bixinta kharashka daawada sida qof qoyskaaga ka tirsan ama saxiib kula ah. Tusaale ahaan, waxa aad codsan kartaa in aynaan adeegsan ama aynaan gudbin macluumaad ku saabsan qaliin lagugu sameeyey.

  Waajib naguma aha in aanu ogolaano codsigaaga haddii uu la xiriiro daaweynta, bixinta kharashka daawada ama ku saabsan yahay wargelin sharcigu na farayo inaanu gudbino. Haddii aynu ogolaano, waxaanu dhaqangelinaynaa codsigaaga, marka laga reebo xaaladaha degdegga ah ee ay lama huraanka

tahay in daryeelkaaga dartiis loo gudbiyo macluumaadkaas.

- **Xaqa aad u Leedahay in Xiriirkeena Qarsoodi laga dhigo**. Xaq waxa aad u leedahay in aad codsato in aanu si gaar ah kuula soo xiriirno dhinaca warbixinada caafimaadka iyo weliba goobo gaar ah. Tusaale ahaan, waxa aad codsan kartaa in aan kaala soo xiriirno shaqada oo kaliya ama kugula soo xiriirno qoraal boostada laguu soo dhigo. Waanu dhaqangelineynaa codsiyadan noocan ah ee suurto galka ah. Codsigaagu waa inuu ku cad yahay sida iyo goobta aad dooneyso in lagaala soo xiriiro.
- **Xaqa aad u leedahay in lagu siiyo Ogeysiiskan oo warqad ku daabacan**. Xaq waxa aad u leedahay in lagu siiyo nuqul ka mid ah ogeysiiskan. Waxa aad weydiisan kartaa nuqul ka mid ah ogeysiiska goortii aad doonto. Xitaa haddii aad ogolaato in lagu siiyo isaga oo habka kombiyuutarka u qoran weli waxa aad xaq u leedahay in lagu siiyo nuqul ka mid ah oo warqad ku daabacan.

Nuqul ka mid ah ogeysiiskan waxaad ka heli kartaa barta internetka ee, www.sparrow.org

Haadii aad dooneyso isaga oo warqad ku qoran fadlan la soo xiriir Sparrow Health System, Service Excellence Department, P.O. Box 30480, 1215 E. Michigan Avenue, Lansing, MI, 48909-7980.

Isbedel lagu Sameyo Ogeysiiskan

Waxaanu xaq u leenahay in aanu isbedel ku sameyno ogeysiiskan. Waxaanu Xaq u leenahay in aanu isbedelkaas dhaqangelino oo uu saameeyo macluumaadka aan horey u heynay iyo midka kale ee aanu kaa heli doono. Isbedelkaas waxaanu ku caddeyneynaa oo aan ku dhajineynaa dhamaan dhismayaasha Goobaha Caafimaadka ee Sparrow. Taariikhda uu dhaqangalayo waxa ay ku qoran tahay dhinac midigta kore ee bogga koowaad.

CABASHOOYINKA

Haddii aad amminsan tahay in lagu xadgudbey xuquuqda aad u leedahay in macluumaadkaaga qarsoodi laga dhigo, waxa aad cabasho u soo gudbin kartaa Goobaha Caafimaadka ee Sparrow ama Xoghayaha Adeega Caafimaadka iyo Dadweynaha ee Dawlada Mareykanka (Secretary of the United States Department of Health and Human Services). Cabashadaada oo qoraal ah waxa aad u soo gudbin kartaa Sparrow Health System, Service Excellence Department, P.O. Box 30480, 1215 E. Michigan Avenue, Lansing, MI, 48909-7980.

Cabashooyinka oo dhan waa in aad ku soo gudbisaa hab qoraal ah. Cabashooyinka aad soo gudbisaa wax saameyn ah oo dhibaato ah kuuma geysanayaan.

ADEEGSIGA KALE EE MACLUUMAADKA

Adeegsiga iyo wadaagista macluumaadka caafimaadka ee aan halkan lagu xusin laakiin sharcigu ogol yahay waxaanu dhaqangelineynaa oo kaliya marka aanu helno ogolaansho qoraal ah. Haddii aad na siiso ogolaansho aanu ku adeegsano ama ku sii gudbino macluumaadkaaga caafimaadka, oo qoraal ah, waad ka noqon kartaa adiga oo noo soo gudbinaya qoraal aad arrintaas ku muujineyso. Ma sii adeegsan doono mana u gudbineyno qolo sadexaad anaga oo tixgelineyna sabaha aad ku muujisey qoraalkaaga. Waa in aad ogaata in aynaan dib u soo celin karin macluumaadkii aanu horey u gudbiney ee aad ogolaatey isla markaan ay waajib nagu tahay in aanu heyno macluumaadkaaga caafimaadka si aanu kuugu fidino daryeelka aad u baahan tahay.